

Mustaqbalka soo dhow nagu caawi inaan qorsheyno isbeddelka baarkinka ee u dhow saldhigga tareenka Judkins Park Light Rail!

Febraayo 2024

Seattle Department of Transportation (Waaxda Seattle ee Gaadiidka, SDOT) iyo Sound Transit waxay ka wada shaqaynayaan sidii ay u samayn lahaayeen qorshe baarkin agagaarka saldhiga tareenka fudud ee East Link Judkins Park, oo la furayo 2025.

Waxaan ka shaqeyneynaa qorshe aan ku dhimeyno baarkinada waddooyinka xaafadaha saldhigga u dhow ee dadka trareenka raaca maalinta oo dhan dhigtaan. Tani waxay kaa caawin doontaa dhimista qiqa kaarboonka, wasakhda hawada, iyo ciriiriga taraafikada ee gaadiidka. Hadafkayagu waa in aan mudnaanta siino baarkinka dadka deegaanka oo aan siino fursadaha baarkinka muddada gaaban ee booqdayaasha ganacsiyada, ururada, dugsiyada, iyo jardiinooyinka. Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruucayaga ka heli kartaa wabsaydhkeena: www.seattle.gov/transportation/judkinspark. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan nala soo xiriir.

Qorshahayaga ee La-soo-jeediyay

- Wuxaan soo jeedinaynaa laba Aag ee Baarkinnada Xaniban (RPZs), mid waqooyiga I-90 ah, iyo mid koonfurta I-90 ah. Calaamadaha RPZ waxa la dhigayaa guryaha la degoo agtooda, waxaana la xaddidaya baarkinka ugu badnaan 2 saacadood laga bilaabo 7 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isninta ilaa Jimcaha, haddaadan haysan waraaq ogolaansho mooyaane.
- Inta lagu jiro maalinta waxaan soo jeedineynaa xaddidaad baarkin oo 2- ama 4-saac ah, barkinadaas oo ku xiga meelaha aan la degganeyn sida meheradaha, dugsiyada, kaniisadaha, iyo jardiinooyinka.
- Wuxaan qorshaynaynaa in aanu samayno goobo cusub oo wax lagu raro meelaha looga baahan yahay in si fudud loo raro loona dejijo dadka iyo alaabaha.

Waxaan u Baahanahay Ra'yi-bixintaada!




Waxaan u baahanahay fikradahaaga si ay nooga caawiyaan qorshaynta. Fadlan qaado ra'yi ururin degdeg ah adoo isticmaalaya isku xirka ama koodka QR ee la bixiyay. Kadib markaan dib u eegno ra'yi-bixintaada, waxaanu dib u cusboonaysiin doonaa qorshaheenna oo aanu jadwalayn doonaa dhagaysi dadweyne xagaaga 2024.

https://www.surveymonkey.com/r/JudkinsPark_Parking?lang=so

Waxa kale oo aad email noogu soo diri kartaa JudkinsParkLR@seattle.gov ama naga soo wac 206-491-9775.





Gelitaanka Saldhigga
 Beeraha nasashada

Aagga La Soo Jeediyay ee Isbeddellada Baarkinka Waddada (Waqooyi)
 Aagga La Soo Jeediyay ee Isbeddellada Baarkinka Waddada (Koonfurta)